
**SOUTH-EAST OTTAWA
CENTRE *FOR A HEALTHY
COMMUNITY***

**MASHAARIICDA IYO
ADEEGYADA**

**CAAFIMAADKA IYO
ADEEGAYADA BULSHADA**

**BULSHADA IYO
ADEEGYADA KAALMADA
GURI**

**BARBAARINTA FIICAN ,
MUSTAQBALKA FIICAN IYO
TALAABADDA SANADAHA
HORE**

MASHAARIICDA BULSHADA

SU'AALO IYO DACWADO

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, ama aad ka walwalsantahay sida loo xaq-dhawri doono sir-shaqsiyeedkaaga ama arrimahaaga aadan doonayn inay cid kale ogaato ee iyagu ku kaydsan xafiisyada SEOCHC, fadlan ha ka gaabsan inaad kala xaajooto arrimahan adeegahaaga ama qofka u qaabilsan sir-shaqsiyeedka xafiiska SEOCHC. Waxaad qofkaas kala xiriiri kartaa cinwaanka ama telefoonka hoos ku qoran. Sidoo kale, haddii aad jeceshahay inaad si gaar ah u akhrisato xeerka u degsan SEOCHC ee ku aaddan xannaanaynta sir-shaqsiyeedka, fadlan booqo bogga internetka ee cinwaankiisu yahay www.seochc.on.ca

Wixii dacwo ah waxaa lagu hagaajin karaa shagsiga u qaabilsan SEOCHC arrimaha sir-shaqsiyeedka.

South-East Ottawa Centre
for a Healthy Community
1355 Bank Street, Suite 600
Ottawa, Ontario K1H 8K7
Phone (613) 737-5115
Fax (613) 739-8199
www.seochc.on.ca

**DHAWRISTA
MACLUUMAADKAAGA
SHAQSIYADEED**



**SOUTH-EAST OTTAWA CENTRE
*FOR A HEALTHY COMMUNITY***

**CENTRE DU SUD-EST D'OTTAWA
*POUR UNE COMMUNAUTÉ EN SANTÉ***

DIFAACIDDA SIR-SHAQSIYEEDKAAGA

Ururinta sir-shaqsiyeedka macaamiishu waxay halbawle u tahay sidii SEOCHC u gudbin lahayd waxqabad caafimaad iyo mid bulsho oo tayo leh. Inkastoo xarunta SEOCHC ay weligeed fahamsanayd muhiimadda ay leedahay dahsoonaantu, haddana waxaan qaadnay talaabooyin aan ku hubinayno sidii loo adkayn lahaa xafidaadda sir-shaqsiyeedkaaga ahna mid waafaqsan xeerarka sir-shaqsiyeed ee u degsan dalkan Kanada loona yaqaan Canada's Personal Information Protection & Electronic Documents Act (2000) iyo Ontario's Personal Health Information Act (2004).

Xifdintaada awgeedna waxaanu leenahay....

- Si aan u ilaalino sir-shaqsiyeedkaaga ...
- Waxaan hirgelinay xeer lagu ilaalinayo sir-shaqsiyeedka.
- Waxaan samaynay adeege u gaar ah arrimaha sir-shaqsiyeedka
- Waxaan dhisnay il-ku-hayn gaar ah oo xag warqadeed, xag elektaroonik iyo xag hadalba ah oo ku saabsan difaacidda arrimaahaga dahsoon.
- Approved a Privacy Policy for the Centre (www.seochc.on.ca).
- Appointed a Privacy Officer to answer your inquiries or concerns.
- Set up safeguards in the handling of paper, electronic and verbal personal information.

BALANQAADKAYAGA

SEOCHC waxaa ka go'an inay ilaaliso sir-shaqsiyeedkaaga oo ah mid nalaku aaminay ahna mid ka dahsoonaan doonna dadka kale.

Shaqaalaha joogtada ah ee xarunta SEOCHC iyo weliba kuwa noogu shaqeeya iskaa-wax-u-qabso waxaa ka go'an inay dhowraan sir-shaqsiyeedkaaga.

1. Marka bixiyaha adeegu kaaqaadayo macluumaadka, Waxa weeye oo keliya wixii kor u qaadaya daryeelkaaga. Xaq laguuguma laha inaad bixiso wax ka baxsan wixii khuseeya booqashadaada.
2. Xarumaha bixiya adeegu waxay u shaqeeyaan si koox-koox ah si lagu siiyo daryeel iyo adeeg dhaxalgal ah. Macluumaadka adiga daryeelkaaga kor u qaadaya waxaa laga yaabaa in lala wadaago kuwa ay khusayso daryeelkaagu. Ma siin doono ama lama wadaagi doono amarkaaga la'aantii macluumaadkaaga kuwa dibada ka ah xarumahaan, marka laga reebo xaalado khaas ah (eeg xadka kalsoonida) Macluumaadkaaga ku jira kaydka adiga oo qudha ayaa leh,
- Laakiin warqadaha ama qolofa kaydka waxaa laha xarunta. Waa lagugu soo dhawaynayaa inaad akhrisato ama koobi ka samaysato.
3. Waanu kaaga jawaab celin wax kasta oo su'aal ah ama dacwad ah ee aad hayso ee ku taxaluqa ilaalinta sir-shaqsiyadeedkaaga ee xaruntaan.

XADKA KALSOONIDA

South-East Ottawa CHC Wax diiwaangelin kartaa macluumaad qof sadexaad, iyadoon lala tashan.

- Haddii aanu rumaysanahay in naftaadu khatar ku jirto ama dadkale.
- Haddii aanu tuhuno in ilmo ka yar 16jir uu ku jiro khatar.

- Haddii kaydkaaga ay maxkamidi xukunto inaanu furno.
- Haddii sharcigu kuu arko qof aan awood u lahayn inuu go'an ka gaari karo naftiisa..
- Haddii cudur ama la kala qaado ama in la sheego ay tahay taas oo la wargelinayo wakaalada caafimaadka bulshada.
- Si loo hubiyo inaad xaq uleedahay ama heli karto faa'iidada daryeelka caafimaad.
- Haddii loo baahdo in la wargeliyo badbaadada goobta shaqo ama guddiga caymiska.

HELISTA MACLUUMAADKAAGA

Haddii aa doonayso inaad daalacato faylkaaga, buuxi foomka loo yaqaan RIF kadibna ku soo celi adeegahaaga. Ballan ayaa loo diyaarinayaa adiga iyo adeegahaaga si aad isula firisaan faylkaaga. Haddi aad doonayso inaad hasho faylkaaga koobigiisa, fadlan u sheeg adeegahaaga waqti hore oo uu ku diyaargaroobi karo, illeyn waxaan u baahanahay waqti aannu kuugu diyaariyo faylkaagee. Qofka sir-shaqsiyeedka u qaabilsan xafiiska SEOCHC ayaa kaa caawin kara habka loo dhamaynayo arrimahan.